Tallada qoysaska ee COVID-19

Waxaa la cusbooneysiiyey Juun 2021

Waxaan si aad u dhow ula shaqeynaynaa Guddiga Ugu sareeya ee Ilaalinta Caafimaadka Australia (Australian Health Protection Principal Committee (AHPPC)), Caafimaadka NSW iyo hay'adaha kale si loo hubiyo in dugsiyadeenu ay u sii wadaan shaqada siyaalaha ugu amaansan ee suurtagalka ee jawiga COVID-19.

Tallada la cusbooneysiiyey ee ka timid Caafimaadka NSW

Waxyaalaha ku cusub macluumaadka ku saabsan COVID-19 waxaa loo bixiyaa si joogta ah. Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay la socdaan website ka soo socda wixii macluumaad ah ee ugu danbeeyey website-ka Dawlada NSW (NSW Government website).

Haddii ay dhacdo in amarada ay isticmaashay hay'ada Caafimaadka NSW iyadoo sababtu tahay dilaaca COVID-19 waxaa laga yaabaa in isbedelo lagu sameeyo hawlgalada dugsiga. Fadlan weydii dugsigaaga wax ku saabsan isbedelada hawlgalada oo raac dhammaan tallooyinka ay bixiyeen shaqaalaha dugsigu, oo ay ku jiraan inaan loo soo gelin dhulka dugsigu ku yaal ujeedooyin aan muhiim ahayn haddii la socdsado.

Guriga wax ku barashada

Ardeyda waa la taageeri doonaa si ay guriga wax ugu bartaan xaaladaha soo socda:

- Haddii lagaaga baahan yahay inaad isgooni yeesho sababtoo ah la kulanka dhow ee qof qaba ama looga shakisan yahay kiiska COVID-19.
- Meeshii dugsiga lagu tilmaamayo tallada caafimaadka dadka weynaha inuu sii wado ka shaqeynta gudaha wax ku barida carruurta shaqaalaha muhiimka ah oo kaliya COVID-19 dilaacay awgii.

Guriga wax ku barashadu wuxuu qaataa qaabab badan, oo ay ku jiraan macluumaadka ilmaha ee online ka ah iyo kuwa aan ahayn iyo alaabta waxbarashada ee daabacan sida ilaha macluumaadka iyo waraaqaha shaqada lagu qabto.

Tallada imaanshaha inta lagu jiro dugsiga wax ku barashada

Sida waafaqsan tallada caafimaadka NSW, waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha waxaa la xasuusinayaa **INAYNAN** u dirin carruurta dugsiga haddii ay xannuunsanayaan, xitaa haddii ay qabaan astaamaha hargabka u eg ee ugu yar.

Caafimaadka NSW waxay codsadeen in dugsiyadu ku dhiirigeliiyaan qofkasta oo xannuunsanaya ama qaba astaamaha hargabka oo kale ah ee yar, in loo sameeyo si ay isaga baaraan xirfadlahooda caafimaadka xaafada ama mid ka mid ah rugaha caafimaadka COVID-19 (COVID-19 clinics).

Shaqaalaha iyo ardeyda qaba astaamaha hargabka u eg waxay u baahan yihiin inay isbaaraan oo ay keenaan nuqulka natiijada baaritaanka COVID-19 iyadoo aan waxba laga helin oo ay noqdaan kuwo aan wax astaamo ah lahayn ka hor intaan loo ogolaan inay dib dugsiga ugu laabtaan.

Ardeyda aan sameyn baaritaanka COVID-19 looma ogolaan doono inay dugsiga ku soo noqdaan 10-maalmood wakhti ah. Waxaa sii weheliya waa inaysan lahayn wax astaamo ah ugu yaraan 3 maalmood ka hor intaysan dugsiga ku soo noqon.

Tallada imaanshaha inta lagu jiro dugsiga wax ku barashada (ayaa sii socoda)

Ardeyda qabta xasaasiyad xilliyeed ama xaalad kale oo u muuqata sida astaamaha hargabka weli waxaa looga baahan yahay inay iska baaraan COVID-19 oo ay soo celiyaan natiijada baaritaanka aan waxba laga helin. Meeshii ay astaamahoodu sii socdaan 10 maalmood ka badan, ardeydu waa inay ka keenaan dukumiinti dhakhtarkooda kaas oo xaqiijinaya in astaamahoodu yihiin nooca xaaladooda. Haddii ardeygu uu yeesho astaamo cusub ama kuwo isbedelay, waa inay iska baaraan COVID-19. Raadi macluumaad dheeraad oo ku saabsan astaamaha COVID-19 (COVID-19 symptoms).

Baaritaanka COVID-19 ee ardeyda qaba baahida gaarka ah ee naafada ama caafimaad ee daran waxaa laga yaabaa mid adag inay tahay. Xaaladahaan, dugsiyadu waxay weydiin doonaan waalidka ama xannaaneeyayaasha in ilmahooda uu qiimeeyo xirfadle caafimaad. Meeshii uu xirfadle caafimaadna go'aamiyo in baaritaanka COVID-19 inaan loo baahneyn, waa in dukumiinti la keenaa dugsiga oo la xaqiijiyo in ardeygu uusan qabin wax astaamo ah oo u baahan inuu iska baaro COVID-19. Shahaadadu waa inay sidoo kale ku qoran tahay in ardeygu awoodo dugsiga inuu ku soo noqdo.

Xasuusin dhamaan qoysaska iyo dugsiyada

Waa muhiim in qoysaska iyo dugsiyadu ay sii wadaan la socoshada awaamiirta COVID-19. Gaar ahaan waxaan dooneynaa inaan bayaamino kuwan soo socda:

- Dugsiyadu waa inay sii wadaan:
  - Dhaqangelinta nadaafada shakhsiyeed, kala fogaanshaha, habka heynta diiwaanka iyo wax nadiifinta.
  - Meeshii suurtagal ah, isticmaal goobaha banaanka ah, haddii cimiladu ogolaato, ama meelaha baalaaran ee furan si ay awood ugu siiso kala fogaansho ku filan inta laysu jirsado.
  - Hubi in dhamaan dadka dugsiga soo booqda ay caafimaad qabaan oo aysan wax astaamo ah qabin, oo ay raacaan nidaamka saxiixida oo ay ku jirto aqbalida inay raaci doonaan waxyaalaha COVID-19 ee dadka booqashada ah, adeeg bixiyayaasha iyo qandaraaslayaasha looga baahan yahay wakhti kasta oo ay soo booqdaan. Dhamaan dadka booqashada ah waa inay isku jeegareeyaan iyagoo isticmaalaya Service NSW QR code. Waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha carruurta keenaya ama qaadayaa uma baahna inay saxiixaan ama ay isticmaalaan Service NSW QR code.

Xirashada iskiriinka heerkulka ama maaskarada afka

Qofkasta oo doonaya inuu ku xirto maaskaradiisa dugsiga lagama reebi doono inuu sidaa sameeyo.

Inta lagu jiro wakhtiyada Amarada Caafimaadka Dadweynaha la soo saaray ku xirashada gaadiidka dadweynaha maaskarada afka, ardeyda jira 13 sanno iyo wixii ka weyn waa inay raacaan tilmaamahan. Shaqaaluhu waa inay sidoo kale raacaan tilmaamahan markay ku safrayaan gaaddiidka dadweynaha iyo sidoo kale inta lagu jiro fasaxyada gaaban ee gaadiidka dadweynaha la saran yahay ama adeega gaadiidka gaarka ah ama la soo kireystay.

Iskiriingareynta heerkulka ee faafsan loogama baahna ama lagulama talinayo dugsiyada dhexdooda.

Alaabta nadaafada iyo nadiifinta dugsiga

Dugsigaagu wuxuu heli doonaa awaamiirta dheeraadka ah ee waafaqsan nadiifinta AHPPC iyo tallada ka imaneysa NSW Health. Goobaha la beegsanayo waxaa ka mid ah goobaha inta badan la taabto iyo meelaha dushoodu adag tahay, albaabka meesha la qabto, sanduuqyada alaabta lagu xirto, furayaasha nalka laga shido iyo biraha gacanta lagu qabsado ee jaranjarada iyo goobaha dhaqdhaqaaqa. Waxaa sidoo kale jiri doona nadiifinta musqulaha oo dheeraad ah iyo biyaha la cabbo iyo soo kordhinta alaabta sida sabuunta.

Dugsiyadu waxay sii wadayaan inay bixiyaan alaabta nadaafada oo ay ku jiraan saabuunta dareeraha ah, jeermi dilaha gacmaha, warqadaha gacmaha lagu tirtiro, jeermi dilaha wax lagu masaxo iyo kuwa dusha kore lagu buufiyo.

Ka jawaabida kiisaska COVID-19

Waxaa jira qorshe cad oo dugsiyada loogu talagalay inay uga jawaabaan kiiskasta oo ah COVID-19 oo laga shakiyo ama lagu xaqiijiyo dugsiyadeena. Waxaan si aad u dhow ula shaqeynaynaa NSW Health waxaana la xiriiri doonaa waalidiinta haddii xaaladi soo baxdo. Akhri wax badan oo ku saabsan nidaamyada kiisaska COVID-19 loogu talagalay (Response protocols for COVID-19 cases).

Gaaddiid

Adeegyada baska ee dugsiga tegaya ama ka imanaya waxay sii wadayaan inay u shaqeeyaan si caadi ah. Wixii tallo safar ah ee aadida dugsiga iyo imaanshihiisa, tixraac Gaadiidka loogu talagalay NSW (Transport for NSW).

Adeega Turjubaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah fadlan wac maamulaha dugsigaaga. Haddii aad u baahan tahay turjubaan kaa caawiya weydiimahaaga fadlan ka wac Adeega Turjubaanka Taleefanka 131 450 oo ku weydiiso turjubaan luuqadaada. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.